Somali Public Agenda

Faallo Kooban 16

Diseembar 2021

Soo koobid

Dowlad-goboleedka Galmudug ayaa gashay colaad dhiig ku daatay kadib markii hoggaanka Ahlu Sunna Waljamaaca ay dib ugusoo laabteen Galmudug bishii Oktoobar 2021 iyagoo ka qeyb galayay xus diimeed sanad walba lagu qabto deegaanka Huurshe. ASWJ ayaa horey looga itaal roonaaday bishii Maarso 2020, waxaana markii ay soo laabteen dagaal ba'an kula galeen ciidamada Galmudug iyo kuwa Dowladda Federaalka Soomaaliya deegaaanka Bohol 30-kii Sebteembar 2021 iyo Guriceel 23-kii Oktoobar 2021. Afar maalmood kadib iska horimaad hubeysan oo aad u ba'an, kaasoo geystay khasaare nafeed iyo mid hanti, ASWJ waxa ay ka baxday Guriceel iyagoo aadday Bohol taasoo ka dhalatay dhexdhexaadin. ASWJ ayaa weli ku sugan deegaanka Bohol, waxaana horjoogayaashoodu ay ka biyo diideen dadaallo iyo baaqyo ay beesha Sheekh Shaakir ku dalbadeen in ciidanka la kala diro oo ay hadafkooda ku raadiyaan qaab nabadeed. Soo laabashada ASWJ ayaa kusoo beegantay xilli Galmudug ay ku dhaweyd gabagabeynta doorashada 8-da xubnood ee ku metela Aqalka Sare iyo bilowga doorashada xubnaha Golaha Shacabka. Faalladan waxay falanqeyneysaa sababaha keenay soo laabashada ASWJ, fursadaha la lumiyay ee looga hortagi karay colaadda iyo muhiimadda Guriceel. Waxa kale oo ay faalladan soo jeedineysaa talooyin tixgelin mudan oo ay ka mid yihiin unkidda ciidamo Daraawiish loo dhan yahay, daadajinta awoodda, dhisidda dowlado hoose oo tayo leh, iyo dib-u-heshiisiin dhab ah.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2021 Somali Public Agenda

Dib usoo laabashada Ahlu Sunna Wal Jamaaca: arrimaha sahlay, fursadaha la lumiyay iyo xalka

Farxaan Isxaaq Yuusuf

Soo ifbixii ASWJ: raadraac kooban

Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ) waxay soo shaacbaxday dabayaaqadii 2008 markii ay al-Shabaab kula dagaallameen Guriceel oo ay guulo ka gaareen. Magaca ASWJ ayaa sare u kacay kadib guul kale oo ay ka xaqiiyeen Dhuusamareeb Janaayo 2009 (Hassan, 2009). Inkastoo aysan ahayn urur si heer sare ah u dhisan, haddana waxa ay isticmaaleen sooyaalkooda suufinimo si ay taageero ugu helaan ururka ay is hayeen. Waxa ay awooddooda ku ballaariyeen deegaanno ka fog Guriceel iyo Dhuusamareeb, waxa ayna gaartay awooddoodu degmada Matabaan oo ka tirsan gobolka Hiiraan, Xeraale, Huurshe, iyo Caabudwaaq oo Galmudug ka tirsan, waxaana ugasoo biiray maleeshiyaad iyo madax sare deegaannadaas iyo magaalooyinkaas.

Intii uu jiray maamulkoodu oo ku dhawaad labo iyo toban sano ahaa (2008 ilaa horraantii 2020), gaar ahaan Matabaan, Guriceel iyo Dhuusamareeb, waxa ay amni siiyeen dadkii iyo deegaannadii ay maamulayeen. Sikastaba ha ahaatee, sida ay ku doodaan dadka dhaliila, horumarka deegaannadaas ay maamulayeen ayaa koobnaa sababo la xiriira ASWJ oo aan furfurneyn. Dhanka kale, ASWJ waxa ay xulafo la ahayd Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) kahor inta aan la dhisin Dowlad-Goboleedka Galmudug 2015, waxaana laga qeyb geliyay fagaareyaasha looga arrinsado arrimaha Soomaaliya.

Horraantii geeddi-socodkii dhismaha maamulka Galmudug ee 2015, ASWJ waa is khilaafeen. Sidaas awgeed, qaar kamid ah xubnaha ASWJ ayaa ka qeyb qaatay geeddi-socodkii dhismaha Galmudug oo ka dhacay degmada Cadaado, kadibna xubno ka noqday maamulka Galmudug. Hoggaanka sare ee kooxda oo uu ku jiro Macallin Maxamuud Sheekh Xasan iyo Sheekh Maxamed Shaakir Cali Xasan ayaa ku gacan seyray maamulka cusub.

Taasi waxay keentay in ASWJ ay dib u qabsato Dhuusamareeb oo ay ciidamada dowladda federaalka gacanta ku hayeen taasi oo ay madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud iyo odayaasha beelaha Galmudug ku heshiiyeen in laga dhigo caasimadda maamulka cusub. Dib-u-qabsashadii ASWJ ee Dhuusamareeb waxay dhalisay in degmada Cadaado oo marti galisay shirka maamul-u-sameynta Galmudug ay sii noqoto caasimadda kumeelgaarka ah ee maamulkaasi. Waxa kale oo ay taasi abuurtay maamul kala qeybsan oo curdin ah.

Xaaladdan ayaa sii jirtay ilaa madaxweynihii xilligaasi ee Galmudug C/kariin Xuseen Guuleed uu is casilay sababo caafimaad awgood. Is-casilaaddiisa ayaa Galmudug u dhalisay waa cusub. Axmed Ducaale Geelle "Xaaf" ayaa hoggaanka u qabtay, wuxuuna maamulka la wadaagay ASWJ, iyadoo ay heshiis dhex-dhexaadin ah ee uu ururgoboleedka IGAD garwadeen ka ahaa ku gaareen Jabuuti bishii Diseember 2017 (IGAD, 2018). ASWJ waxaa la siiyay, xilka madaxa xukuumadda Galmudug, xilkaas oo aan kamid ahayn qaab dhismeedka dowlad-goboleedyada Soomaaliya sidoo kalana ahayn jago dhaqan ahaan la aqoonsan yahay ilaa hadda. Hase yeeshee, waxay ahayd xal lagu doonayay in loogu biiriyo ASWJ maamulka Galmudug lagana gudbo kala qeybsanaanta. Nasiib darrose, tani waxay ugu dambeyntii cuuryaamisay howlihii shaqo ee maamulka.

Dhowr bilood kahor inta uusan dhammaan xilka Xaaf, ayaa dowladda federaalka waxa ay ku dhawaaqday in ay qaban qaabineyso dhismaha maamul cusub oo Galmudug yeelato. Madaxweynaha Galmudug ayaa xilligaasi ku gacan seyray tallaabadaas, waxaana uu soo saaray amarro ah in cid ka tirsan dowladda federaalka aanay soo geli karin Dhuusamareeb. Hase yeeshee, ASWJ kuma aysan raacsanayn arrintaas, waxayna u fududaysay saraakiisha dowladda federaalka inay kasoo degaan garoonka diyaaradaha Dhuusomareeb, oo ay maleeshiyaadka ASWJ sugayeen ammaankiisa.

Kadib hannaan dib-u-heshiisiin dheer oo adag iyo mid doorasho, dowladda federaalka waxa ay 20 xildhibaan siisay ASWJ si ay uga mid noqdaan golaha baarlamaanka cusub ee dowlad-goboleedka Galmudug. Tani waxay daba socotay dood adag oo ku saabsan ku biirinta maleeshiyaadkooda qaab dhismeedka ciidanka dowladda federaalka. Sikastaba ha ahaatee, saamigan la siiyay kuma qancin hoggaanka ASWJ. Waxa ay xarunta Inji ee Dhuusamareeb kaga dhawaaqdeen gole baarlamaan oo barbar socda kan Galmudug iyo in Sheekh Maxamed Shaakir Cali Xasan uu yahay madaxweynaha Galmudug bishii Janaayo 2020. Dowladda federaalka waxay adeegsatay xoog ciidan bishii Maarso 2020 si ay usoo afjarto caqabadda ASWJ kadib markii ay fashilmeen dadaallo lagu xallinayey arrinta oo ay wadeen odayaasha iyo siyaasiyiinta beel hoosaadka labada hoggaamiye ee ASWJ. Dagaalka ASWJ waa looga adkaaday taana waxay keentay in Sheekh Maxamed Shaakir Cali Xasan iyo Macallin Maxamuud ay Dhuusomareeb ka baxaan iyagoo si dhuumaaleysi ah ugu amba baxay Gaalkacyo, kadibna u duulay Nairobi.

Faalladan waxa diiradda lagu saarayaa dib-usoo-laabaashada kadiska ah ee ASWJ ee Galmudug, sababihii keenay soo laabashadooda, fursadihii la lumiyaya ee lagu baajin karay colaadda, muhiimadda Guriceel, iyo siinta Guriceel maqaamka degmanimo. Faallada waxa ay isticmaashay xogaha gacanta koowaad iyo kuwa gacanta labaad si loo qiimeeyo loona sharxo xaaladda hadda jirta. SPA waxay isticmaashay wararka warbaahinta, iyo wareysiyo dad xog-ogaal ah oo lala yeeshay saxafiyiin, masuuliyiin ka tirsan maamulka Galmudug, ganacsato, iyo xubno ka tirsan bulshada rayidka intii u dhexeysay dabayaaqadii Oktoobar iyo horraantii Noofembar 2021.

Galmudug oo ay kedis ku noqotay dib-usoo-laabashada ASWJ

Kadib in ka badan sanad iyo bar oo ay si iskood ah dibad-joog u ahaayeen, madaxda sare ee ASWJ waxay dib ugu laabteen Galmudug iyagoo kasoo ambabaxay dalka Turkiga oo la sheegay inay ku sugnaayeen muddo sanad ah. Hoggaamiyeyaasha kooxda – Sheekh Maxamed Shaakir Cali Xasan iyo Macallin Maxamuud Sheekh Xasan – ayaa kasoo kala degay garoomada diyaaradaha ee Guriceel iyo waqooyiga Gaalkacyo 11-kii Sebtembar 2021 (Mustaqbal Media, 2021).

Imaatinkooda kadib ayaa mid walba waxa uu safar dhanka dhulka ah ku tagay deegaanka Huurshe oo qiyaastii 70km dhanka waqooyi kaga beegan magaalada Dhuusomareeb. Ujeedka ay dib ugusoo laabteen Galmudug iyo gaar ahaan Huurshe ayay ku sheegeen in ay tahay ka qeybgalka xus sanadle ah oo lagu xuso Sheekh Yuusuf Direed oo qabrigiisa uu ku yaallo deegaanka Huurshe. Xuska ayaa waxaa kasoo qeyb galay maleeshiyaadkii hore ee ASWJ oo lagu biiriyay qeybaha kala duwan ee ciidamada dowladda federaalka. Hoggaanka ASWJ, gaar ahaan Sheekh Shaakir, ayaa billaabay abaabul iyo soo-celin xiriir uu la lahaa maleeshiyaadkiisii hore. Maalmo gudahood ayuu Huurshe ku uruuriyay ciidamo u badan beeshiisa iyo ciidamo kasoo goostay dowladda federaalka iyo Galmudug si ay u garab istaagaan madaxdoodii hore.

Maleeshiyada ayaa kasoo guuray deegaanka Huurshe, waxa ayna u dhaqaaqeen dhanka deegaanka Bohol, kadib markii odayaasha Huurshe ay u sheegeen in aysan deegaankooda ka abaabulin colaad ka dhan ah Galmudug. Deegaanka Bohol waxay qiyaastii 20km dhanka waqooyi kaga beegan tahay Dhuusamareeb, waxa ayna deegaan u tahay Sheekh Shaakir – hoggaamiyaha ASWJ – iyo jufadiisa. 30-kii Sebteembar 2021, dagaal u dhexeeya ASWJ iyo ciidamada Galmudug iyo ciidamada dowladda federaalka ayaa ka dhacay Bohol halkaasoo ugu yaraan 20 qof ay ku dhinteen 10 kalena ay ku dhaawacmeen (VOA Somali, 2021).

Ciidamada Daraawiishta dowladda federaalka iyo kuwa Galmudug ayaa weerar ku qaaday deegaanka Bohol. Balse, way loodin waayeen maleeshiyaadkii hubaysnaa ee ASWJ, waxayna dib ugu laabteen Dhuusomareeb. Weerarkan aan lagu guulaysan kadib, ASWJ waxay u dhaqaaqday Guriceel, oo ah magaalo ay dooneysay. Waxay magaalada ka qabsatay dhowr askari oo booliis ah dagaal la'aan 1-dii Oktoobar 2021 (VOA Somali, 2021). In ASWJ ay qabsato magaaladaas waxay dhabar jab xooggan ku noqotay maamulka Galmudug, sababtoo ah waxay astaan u ahayd dowlad-goboleedka.

Dowlad-goboleedka Galmudug ayaa qorsheysay weerar adag oo ay ku doonaysay inay ASWJ magaalada gacan ku heynteeda kala wareegaan iyagoo kaashanaya ciidamada dowladda federaalka. Kadib afar maalmood oo ay dagaallo culus socdeen, oo ay ku dhinteen ugu yaraan 120 kamid ah dhinacyadii dagaallamayay, ayna ku dhaawacmeen in ka badan 600 oo qof, ayay ASWJ ka baxday Guriceel waxa ayna aadeen dhanka Bohol. Arrintaas ayaa lagu gaaray dhexdhexaadin aan rasmi ahayn oo uu ka sameeyay nin ganacsade ah oo ay isku jufo yihiin Sheekh Shaakir.

Arrimaha keenay dib-u-soo laabashada AWSJ

Maadaama dhacdooyin welwel leh ay ka dheceen Galmudug, waxaa muhiim ah in la eego arrimaha ka bixin kara sharraxaad macquul ah dib usoo laabashada ASWJ ee lama filaanka ahayd ee Galmudug. Arrimo badan ayaa ka qeyb qaatay soo noqoshada kooxda. Waxaa kamid ah:

Gocasho hore ee ASWJ oo aan wax laga qaban: markii dowladda federaalka ay kaga awood roonaatay maleeshiyada ASWJ bishii Maarso 2020 magaalada Dhuusamareeb, ASWJ waxa ay isku dhiibtay ciidamada dowladda federaalka ee joogay Galmudug. Ka gadaal soo jeedin ay lahaayeen odayaasha labada hoggaamiye ee ASWJ, dowladda federaalka waxa ay sii deeysay hoggaankii ASWJ. Labadan sheekh ayaa si aan u qalmin ugasoo ambabaxay magaalada Dhuusomareeb iyagoo u safray dhanka waqooyi ee magaalada Gaalkacyo halkaasoo ay diyaarad uga raaceen Kenya. Inkastoo aan lagu sifeyn karin kas ama kama'a, haddana madaxweynaha Galmudug ma sameyn dadaal mug leh ee uu kula hadlaayo madaxdii hore ee ASWJ si uu kula la heshiiyo ama u xalliyo waxa ay tabanayaan, ama uu ugu biirin lahaa maamulka Galmudug si maamulka looga ilaaliyo khatarta ka iman karta kooxda laga adkaaday. Sidaas darteed, kuwii laga adkaaday ayaa dareenkooda xakameeyay oo aan bannaanka keenin iyagoo sugay waqtiga saxda ah oo ay ka faa'iidaysan karaan. Haddaba, haddii maamulka Galmudug uu billaabi lahaa dadaallo uu ku doonayo inuu kula macaamilo madaxda kooxda, waxaa la yarayn lahaa fursadda dib usoo laabashada kooxda.

Tabashooyin ay qabeen saraakiishii hore ee ASWJ ee qaab-dhismeedka ciidamada dowladda federaalka lagu biiriyay: iyadoo qeyb ka ah geeddi-socodkii dhismaha dowlad goboleedka Galmudug ee 2019, dowladda federaalka waxay ku biirisay maleeshiyaadkii hore ee ASWJ qeybaha kala duwan ee ciidamada Soomaaliya, sida militariga, booliiska, iyo sirdoonka. Sida ay noo sheegeen ilo xog-ogaal ah kuna sugan Galmudug, waxaa jiray tabashooyin isisoo tarayay oo ay qabeen saraakiishii hore ee ASWJ ee ka tirsan ciidamada dowladda federaalka ee ku sugan Galmudug oo u badnaa dallacsiin la'aan iyo ballan-qaadyo aan loo fulin. Saraakiisha qabay tabashooyinka ayaa dib ugu goostay ASWJ kadib markii madaxdoodii hore ay dib ugu laabteen Galmudug.

Howlgallada al-Shabaab oo kusoo badanaya degaannadii hore ee ASWJ: Sara-u-kaca weerarrada iyo miinooyinka al-Shabaab ee ka dhacayay gudaha iyo hareeraha wadada isku xirta Guriceel iyo Dhuusomareeb ayaa marmarsiiyo macquul ah u noqotay soo laabashada ASWJ. Dadka ku dhaqan magaalooyinkii ay horay u maamuli jireen Ahlu Sunna Wal Jamaaca ayaa dareemaayay dhibaato amni-darro ee ka dhalatay howlgallada roondada ah ee habeenkii al-Shabaab ay ka sameeyaan agagaarka Dhuusomareeb iyo Guriceel. Sababtaas awgeed, dadka deggan magaalooyinkaas waxay u hiloobeen ammaankii ay haysteen xilligii Ahlu Sunna Wal Jamaaca. Febraayo 7, 2021 Taliyihii NISA ee Dhuusamaareeb Gaashaanle Cabdirashiid Cabdinuur Qooje iyo 11 askari oo la socday ayaa lagu dilay qarax haleelay gaarigii ay wateen inta u dhexeysa wadada isku xirta Dhuusomareeb iyo Ceel Dheere. Al-Shabaab ayaa sheegatay mas'uuliyadda weerarkan (VOA Somali, 2021),

waxaana dhacdadan, iyo weeraro kale oo yar yar oo xigay tan iyo xilligaas, ay wadadan ka dhigtay mid aanay mari karin madaxda iyo shaqaalaha Galmudug.

Galmudug ma laha ciidamo ammaan oo loo dhan yahay oo heer dowlad-goboleed ah: Galmudug ma laha ciidamo ilaaliya – marka laga reebo ciidamada daraawiishta – oo si gaar ah ugu xilsaaran sugidda amniga deegaannada hoos yimaada. Tan iyo dabayaaqadii 2019, dowladda federaalka waxa ay Dhuusamareeb u daabushay ciidamo markaas oo ay u diyaar garoobeysay geeddi-socodka maamul u sameynta Galmudug. Ciidamadan ayaa ilaalinayay xarunta maamulka ee magaalada Dhuusamareeb. Galmudug waxay dhistay ciidamo Daraawiish ah. Ciidamada hadda jooga ee Daraawiishta ayaa lagasoo xulay hal beel hoosaad oo kamid ah beelaha dega Galmudug. Arrintan ayaa Galmudug ka dhigtay mid u nugul qolo kasta oo doonaysa in ay awood adeegsato in ay tanaasul ka hesho maamulkan curdunka ah. Maleeshiyaadkii hore ee ASWJ oo lagu biiriyay qaab-dhismeedka ciidanka dowladda federaalka ayaa ku sugan Galmudug, welina daacadnimadooda kama aysan wareegin ASWJ.

Si khaldan u maamuliddii doorashada Aqalka Sare iyo tabashooyinka ku aaddan doorashada Golaha Shacabka ee Galmudug: Madaxweyne Qoorqoor ayaa liiska musharraxiinta Aqalka Sare ka reebay shaqsiyaad badan oo daneynayay in ay tartamaan. Waxaa lagu eedeeyaa in uu kuraastii u xiray musharraxiin uu doorbidayay waxaana taasi ay keentay in ay cadaawad qaadaan dadkii doonayay inay u tartamaan kuraasta Aqalka Sare iyo kuwa loo maleynayo in ay taageero siinayeen. Sidoo kale, waxaa jira walaac ay dadka qaar qabaan oo ku aaddan in qabsoomidda doorashada Golaha Shacabka ay suuragal tahay in waddadaas ay marto. Sababtaas awgeed, qaar kamid ah siyaasiyiintii kasoo jeedday dowlad-goboleedka ee xiriirkooda Madaxweyne Qoorqoor uu xumaaday iyo kuwo u malaynaya in aanu iyaga la safan doonin iyo/ama aanu u caddaalad faleynin musharraxiinta, ayaa teegeero u muujiyay duullaanka ASWJ ee ka dhanka ahaa Galmudug. Daraasad ay wadajir u sameeyeen Somali Public Agenda iyo Interpeace oo la daabacay Abriil 2021 kuna saabsaneyd dib-u-heshiisiinta Galmudug ayaa ka digtay in Galmudug ay ka dhici karaan qalalaaso haddii Madaxweyne Qoorqoor uusan u maamulin doorashada si dhexdhexaad ah. Digniintaas waa la baal maray, weyna dhabowday.

Fursado la khasaariyay

Kadib markii hoggaamiyeyaasha ASWJ ay yimaadeen Galmudug, ayna billaabeen in ay uruursadaan maleeshiyaad, waxaa muuqatay sida ay khatar ugu noqon karaan dowlad-goboleedka curdanka ah ee Galmudug. Hoggaanka Galmudug kama bixin jawaab ku habboon oo degdeg ah khatarta kooxdan ay ku majaxaabin karto awooddooda. Maamulka Galmudug waxa uu heystay fursado uu uga hortagi karay hoggaanka ASWJ in ay abaabulaan dagaal faraha looga gubto, balse taasi ma aysan sameynin.

Ugu horreyn, dowlad-goboleedka Galmudug waxa ay ku guuldarreysatay in ay la heshiiso hoggaamiyayaasha kooxada. Madaxaweyne Axmed Qoorqoor waxaa laga sugayay in uu gacan u fidiyo hoggaamiyayaasha ASWJ si loo xalliyo tabashooyinka jira. Sikastaba, arrintaasi ma aysan dhicin.

Marka labaad, dowlad-goboleedka Galmudug waxa ay si taxadar leh u diyaarin kartay ciidan loo dabuuli karay Huurshe oo ah halka munaasabaddu ka dhaceysay. Ciidankaasi waxa ay la wareegi kareen amaanka munaasabadda iyagoo wadashaqeyn iyo iskaashi la sameynaya odayaasha dhaqanka iyo culimadda deegaanka. Ciidamada ammaanku waxa ay il feejigan ku heyn kareen dhaqdhaqaaq walba ee ka baxasan xeyndaabka munaasabadda, kana hortagi kareen in abaabul la sameeyo. Marka ay munaasabaddu soo gebagebowday, ciidamada ammaanku waxa ay usoo galbin kareen hogaamiyeyaasha ASWJ magaaladda Dhuusamareeb. Madaxweynaha iyo xubnaha golaha wasiiradiisa ayaa kusoo dhaweyn karay booqasho hab-maamuus huwan.

Marka saddexaad, Galmudug ma xoojin xirriirka dowlad-goboleedka iyo maamulladda heer degmo. Awoodda waxa ay taallaa magaalo madaxda dowlad-goboleedka, waxa ayna ku jirtaa gacanta madaxweynaha. Arrintan waxa ay abuurtay firaaq ballaaran oo u dhexeeya labada heer ee dowladeed. Arrintan ayaa waxa ay keentay in magaalooyinka qaar looga shakiyo in ay u janjeeraan ASWJ, maadaama aanay jirin faa'iido la taaban karo oo ay ka helaan dowlad-goboleedka.

Maxay Guriceel uga dhigantahay Galmudug?

Guriceel waxa ay leedahay muhimado dhowr ah, kuwaasoo ka dhigaya meel muhiim u ah cid walba oo dooneysa in ay awood ku yeelato Galmudug, haddii ay tahay dowlad-goboleed ama kooxaha kale. Muhimmada magaaladu leedahay waxa ay ka imaaneysaa meelo kala duwan.

Waa magaalo xuddun u ah ganacsi iyo dhaqaale: Dowlad-goboleedka Galmudug waxa ay leedahay labo kastam: mid waa kan koonfurta Galkacyo, halkaasoo uu maamulku ka uruuriyo canshuurta gaadiidka badeecadaha ka keena dekedda Boosaaso ee Puntland iyo deegaannada ka xaggeeya, halka kastamka labaad uu yahay Guriceel. Inta ugu badan xoolaha laga dhoofiyo dekedda Boosaaso waxaa sidoo kale laga keenaa Guriceel iyo deegaannadda ku hareersan, illaa iyo gobolka Hiiraan. Intaa waxaa dheer, Guriceel waxa ay leedahay suuqa xoolaha ee ugu ballaran deegaannada Galmudug. Shirkadaha ka ganacsada xoolaha ayaa xarumahooda ugu waaweyn ama laamo ku leh Guriceel. Haddaba, suuqa xoolaha ee Guriceel ayaa ah xarun muhiim u ah hilibka laga cuno Galmudug iyo deeggaannada ka xaggeeya. Dadka u dhuun-daloola howlaha ganacsiga ee Guriceel iyo muhimmadda dhabta ah ee ay dakhli uruurinta dowladda u leedahay waxa ay hoosta ka xariiqeen in magaaladaasi tahay xarun canshuur badan kasoo xaroota oo muhiim ah oo ka dheereysa degmooyinka kale ee Galmudug. Marka la eego ilaha kala duwan ee dakhliga gudaha ee usoo xaroodo Galmudug, canshuuraha ugasoo xaroota kastamyada Guriceel waxa ay u dhigan tahay in ka badan 50% wadarta dakhliga gudaha kasoo xaroota.

Faa'iidada xagga juqraafiga: Guriceel waxa ay ku taallaa barta ay ku kulmaan dowlad-goboleedyadda Hirshabeele iyo Galmudug. Ku dhawaad 100 tuulo oo ku teedsan xuduudda Itoobiya-Galmudug, and Hiiraan-Galmudug ayaa waxyaabaha nolosha asaaska u ah uga yimaada Guriceel. Sidoo kale, dadka degmadda Ceel-buur iyo tuulooyinka ku teedsan ayaa Guriceel waxa ay u tahay halka noloshoodu ku tiirsan tahay, maadaama ay u tahay isha ugu muhiimsan ee ay ka helaan badeecadaha iyo adeegyada daruuriga ah.

Muhimmadda xagga diinta: Guriceel waxa ay hooy u aheyd dariiqada suufiyada, gaar ahaan tan Qaadiriyada, taasoo ku laheyd raciyad xooggan deegaanka iyo inta ku hareereysan. Marka ASWJ ay kusoo laabatay dhawaan, ayna dagaal kula gashay ciidamadda Galmudug deegaanka Bohol, taageereyaasha daacadda u ah kooxda ee Guriceel, gaar ahaan macallimiinta malcamadaha Quraanka ayaa soo baxay oo hubka qaatay si ay u taageeraan ASWJ, islamarkaana uga hortagaan waxa ay ugu yeereen "duullaanka Salafiyada". Tani waxa ay aheyd aragti aan toos aheyn oo ay ka heystaan dadka dowladda-goboleedka Galmudug ka tirsan oo aan raacsaneyn caqiidada iyo dhaqamadda Suufiyadda.

Guriceel oo tixgelin gaar ah heshay

ASWJ waxa ay ka baxaday Guriceel kadib afar cisho ee uu dagaal culus socday, kaasoo sababay geerida in ku dhaw 120 qof ee labada dhinac ee dagaallamayay. Waxaa jiray qiyaastii 600 oo dhawacyo ah oo labada dhinac ah, iyo barakac ka dhashay dagaalka oo in ka badan 100,000 oo qof (16,740 qoys) ay ku barakaceen, iyo burbur hantiyeed oo ay ku jiraan isbitaallo (VOA Somali, 2021). Dhibaatadan kadib, madaxweynaha Galmudug iyo golehiisa wasiirada ayaa yimid Gurceel, waxa ayna ku qabteen shirka golaha wasiiradda oo aan caadi aheyn 29-ka Oktoober 2021.

Golaha wasiirrada waxa ay ka wada hadleen waxyaabo badan oo ay ku jirto xaaladda Guriceel. Kadib markii ay dhageysteen soo jeedin ka timid Wasiirka Arrimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta iyo Dowladaha Hoose, golaha wasiirrada ayaa si wadar ah u meel mariyay in Guriceel loo dallacsiiyo degmo. Warkaan oo muddo la dhowrayay ayay dadka Guriceel deggan soo dhaweeyeen.

Dadka Guriceel ayaa ka gadoodsanaa is-hortaagga Guriceel lagu sameeyay ee ahaa in ay ka qeybgasho kulanka Barmaamijka UN Joint Program for Local Government (JPLG) ee lagu qabtay Dhuusamareeb. Is-hortaagga looga sameeyay Guriceel in ay ka qeybgasho kulankaas ayaa waxaa loo sababeeyay in Guriceel aysan laheyn maqaam heer degmo kaasoo u suuragilanaya in ay ka faa'ideysato barnaamijka JPLG. Arrintan ayaa waxa ay dadweynaha Guriceel ku dhalisay caro ay baraha bulshada ugu gudbiyeen sida ay u diiddan yihiin arrinkan. Waxa ay ka cawdeen in dowlad-goboleedka Galmudug ay dhegaha ka fureysatay magaaladooda iyo maqaamka ay mudan tahay. Dadka cabanayay ayaa sheegay in Guriceel ay tahay meel si weyn wax ugu biirisa dakhliga Galmudug marka loo eego degmooyinka kale.

In golaha wasiirrada Galmudug ay Guriceel u dallacsiiyeen degmo waxa ay u muuqataa in loogu talagalay lagu daboolo dhacdooyinka kale ee lamid ah tan ASWJ qabsashadeeda magaalada. Talaabadan waxa ay dejisay dareenka dadweynaha Guriceel ee ahaa in dowlad-goboleedka Galmudug aysan siinin xuquuqihii ay ka rajeeynayeen.

Kadib marki maqaam degmo loo dallacsiiyay, saraakiisha maamulka Guriceel ayaa ka qeyb galay kulanka JLGP ee Dhuusamareeb, kaasoo madaxweyenuhu furay. Sidoo kale, dowlad-goboleedka Galmudug ayaa go'aansatay in cidaamo joogto ah la geeyo degmada si ay uga hortagaan khataraha la filan karo ee xagga ammaanka ah.

Si loo dhammeystiro hannaanka degmo ka dhigsta Guriceel, baarlamaanka Galmudug ayaa si wadar ah ugu codeeyay in Guriceel degmo buuxda oo dowlad-goboleedka Galmudug ka tirsan laga dhigo 16-kii Nofeember 2021. Ugu dambeyn, 20-kii Nofeember 2021, madaxweynaha Galmudug ayaa qalinka ku duugay meelmarintii ay sameeyen baarlmaanka Galmudug ee ahaa in Guriceel loo dallacsiiyo maqaam degmo. Halkaas waxaa kusoo xirmay arrinkii ku saabsanaa In Guriceel degmo loo aqoonsado, taasoo aheyd qodax ku taagan dowlad-goboleedka. Guriceel ayaa noqoneysa magaaladii ugu horreysay ee loo aqoonsaday degmo Galmudug ka tirsan iyadoo la marayo hannaanka tooska ah ee sameynta degmooyinka.

Xalka

Colaaddii hubeysneyd ee dhawaan Galmudug ka dhacday iyo khatarta soo laablaabatay ee ka imaaneysa ASWJ casharro ayuu ka baran karaa hoggaanka maamulka Galmudug. Casharadda ugu habboon ee laga baran karo ee kasoo baxay colaadan iyo sida hore loogu dhaqaaqi karo, oo loo joogteyn karo xasillooni iyo isku-duubnaan waxaa kamid ah:

In la dhiso ciidamo Daraawiish loo dhan yahay: si looga baaqsado soo laabashada coladaha hubeysan ee nuucan ah, iyo in laga howlgalo khatarta dowlada-goboleedku wajahayo, maamulka Galmudug waa inuu dhisaa ciidamo dowladdu leedahay oo isku dhaf ah, kuwaasoo ka kooban beelaha 11-ka ah ee dowlad-goboleedka deggan. Hadda marka la eego, Galmudug waxa ay ku tiirsan tahay ciidamada dowladda federaalka marka laga hadlayo soo dabaalidda amniga caasimaddeeda, mana awoodo maamulka in uu iska caabiyo khataraha jira ama soo wajihi kara. Galmudug waxa ay khatar ugu jirtay in ASWJ la wareegto haddii dowladda federaalka aanay usoo gurman lahayn si ay u badbaadiso.

Daadajinta awoodda iyo dhismaha maamul-hoosaadyo waxtar leh: dowlad-goboleedku waa in uu awoodaha ka daadejiyaa caasimadda ee uu gaarsiiyaa degmooyinka, una dhaweeyaa adeegga iyo mashaariicda horumarinta dadweynaha degmooyinka Galmudug. In la daadajiyo awoodda iyo adeegga waxa ay ahayd ujeedka loo qaatay hannaanka federaalka ee Soomaaliya, waxa ayna dadka deegaanka u oggolaaneysaa in ay ka qeyb qaataan, islamarkaana dareemaan lahaansho la xiriira aayahooda, halka ay dareemi lahaayeen in dusha sare lagaga keenay maamul, lana xisaabtami karaan madaxdooda. Haddii Galmudug iyo maamullada kale ay u daadejiyaan awoodaha iyo adeegyada heer degmo, waxaa si weyn meesha uga baxaya xiisadaha, dowlad-goboleedyadana waxa ay ka heli karaan degmooyinka sharciyad ballaran.

Madaxweyne Qoorqoor waa in uu waqti ku qaataa Galmudug: madaxweynaha ayaa ka maqnaa dowlad-goboleedka in badan waqtiga uu xafiiska joogay. Waxa waqtigiisii maansheeyay doodda ku saabsaneyd nooca doorashada ee ka dhexeeysay dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, iyo muranka dambe ee ka dhexeeyay madaxweynaha dowladda federaalka iyo raysal wasaaraha. Inta madaxweynuhu uu ka maqanaa dowlad-goboleedka Galmudug, horumarka dowlad-goboleedka ayaa istaagay, waxa ayna keentay weydiimo, qaarkeedna waxa ay keentay fursad ay kooxo ku abaabulaan rabshad keentay in xasilooni darro soo wajahdo dowlad-goboleedka curdanka ah. Haddaba, madaxweynaha waa inuu waqtigiisa ugu badan ku qaataa dowlad-goboleedka si uu waajibkiisa u guto, una xalliyo caqabadaha maxalliga ah ee hortiisa yaalla.

Dib-u-heshiisiin dhab ah: colaaddii hubeysaneyd ee dhawaan Galmudug ka dhacday waxa ay aheyd natiijo ka dhalatay dayacaad ku timid in dib-u-heshiisiin dhab ah laga sameeyo dowlad-goboleedka, taasoo lagu booga-dhayayo tabashooyinkii ay qabeen bulshada qaar, gaar ahaan ASWJ, si sare loogu qaado sharciyadda dowlad-goboleedku uu heysto. Dib-u-heshiisiin ayaa ka qarash yar in dagaal lagu dhammeeyo murannada taagan. Marnaba maahan wax aan laga guul gaari karin, mana ahan in ay fulaynimo u tahay dowlad-goboleedka Galmudug in uu la heshiiyo qeyb walba oo tabashooyin ka qabta – gaar ahaan ASWJ – si looga hortago in dhiig kale uu daato.

Tixraac

Hassan, A., 2009. Inside Look at the Fighting Between Al-Shabab and Ahlu-Sunna Wal-Jama. *Combating Terrorism Center*, MARCH, 2(3).

IGAD, 2018. *THE LAUNCH OF THE IMPLEMENTATION OF A PEACE AGREEMENT BETWEEN GALMUDUG ADMINISTRATION AND AHLU SUNA WALJAMACA (ASWJ) ON MERGING OF PARLIAMENTS AND POWER-SHARING*. [Online] Available at: https://igad.int/programs/66-somalia/1789-the-launch-of-preliminary-agreement-between-the-leadership-of-galmudug-and-ahlu-suna-w%3E [Accessed November 2021].

Mustaqbal Media, 2021. *Macalin Maxamuud & Sheekh Shaakir oo sanad & 8 bilood ka dib ku laabtay Galmudug*. [Online] Available at: https://mustaqbalmedia.net/so/macalin-maxamuud-sheekh-shaakir-oo-sanad-8-bilood-ka-dib-ku-laabtay-galmudug/ [Accessed November 2021].

VOA Somali, 2021. *Ahlu-sunna oo qabsaday magaalada Guriceel*. [Online] Available at: https://www.voasomali.com/a/6253327.html [Accessed November 2021].

VOA Somali, 2021. *Dagaalkii deegaanka Bohol oo istaagay iyo khasaare ka dhashay*. [Online] Available at: https://www.voasomali.com/a/6251833.html [Accessed November 2021].

VOA Somali, 2021. *Taliyihii Nabadsugida Dhuusamareeb iyo 11 askari oo qarax lagu dilay*. [Online] Available at: https://www.voasomali.com/a/5768528.html [Accessed November 2021].

VOA Somali, 2021. *UN: More Than 100,000 Somalis Displaced by Fighting in Central Galmudug Region*. [Online] Available at: https://www.voanews.com/a/un-more-than-100-000-somalis-displaced-by-fighting-in-central-galmudug-region-/6286249.html [Accessed November 2021].